



Federal Republic of Somalia
Office of the President

SHARCILR. Lr. 12

Taariikh: 11/01/2016

OGGOLAANSHAHAA ANSAXINTA MIISAANIYADDA 2016

MADAXWEYNHA J.F.S,

- Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha "A", "B" iyo "C"
ee Dastuurka KMG
- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG
- Markuu Arkay: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka
Lr. 1059/3/1/9/15 ee 31/12/2015
- Markuu Tixgeliyay: Ansaxinta Golaha Wasiirada ee Xukuumadda Federaalka
Soomaaliyed Lr.XRW/000607/10/2015 ee ku saabsan
Ansaxinta Miisaaniyadda 2016 go'aankaasi oo soo baxay
29/10/2015

Wuxuu soo saaray:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta uu Madaxwaynaha saxiixo isbeddel waxaa la oggolaaday
Miisaaniyadda 2016.

Qodobka 2aad

Waxaa la faraya hay'adaha ay khusayso dhaqangelinta Miisaaniyaddaan inay si
degdeg ah u dhaqangeliyaan.

Qodobka 3aad

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda awood loo siliyay inay seddaxdii biloodba ay ku
samayn karto isbeddel haddii loo baahdo iyada laga soo ansaxinaayo Baarlamaanka.



Federal Republic of Somalia
Office of the President

Qodobka 4aad

Waxaa Xukuumadda, iyada oo soo jeedinaayo Wasiirka Maaliyadda in la isticmaalin xisaab wadareedka Miisaaniyadda 2016 markii loo arko danta guud.

Qodobka 5aad

Waxuu Wasiirka Maaliyadda in xisaabta la hakiyo xilli aan ka badnayn seddax bilood si isbeddel dheeri ah loogu sameeyo

Qodobka 6aad

Waxuu Sharcigaan dhaqangeliya isla markii uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

MUQDISHO: 11/01/2016



Madaxwaynaha J.F.S

Mudane Xasan Sheikh Maxamuud



Ref: 1059/3/1/9/15 الرقم:

Mogadishu, 31st December 2015 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Wasaaradda Maaliyadda.
Muqdisho.

Og: Garyaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Hanti-Dhowrka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorsheynta iyo
Iskaashiga Caalmiga iyo La-xisaabtanka Hay'addaha Dowladda.
L/H. Golaha Shacabka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/H. Golaha Shacabka.

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda
L/H. Golaha Shacabka

Ujeeddo: Ansixinta Miisaaniyadda 2016.

M.ne Madaxweyne;


Waxaan kuugu wargelinaya inuu Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Miisaaniyadda 2016 oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 7aad ee Fadhiisi 27aad taariikhda markay aheyd 31st December 2015 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jumhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 136 (Boqol Sodon iyo Lix Xildhibaan).
- Xildhibaan diidey: 2 (Laba Xildhibaan).
- Xildhibaan ka aamustay 2 (Laba Xildhibaan).

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa inaad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka




MJ/AM

ANSIXINTA MIISAANIYADDA 2016.

Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS

Tirada Xubnaha Codeysay 140: Oggol (136) Diidmo (2) ka aamustay (2)



Taariikh: 31st December 2015


Saxiix: M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS

Taariikh: 31st December 2015

Saxiix: M.ne Jeylaani Nuur Iikar

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS



Taariikh: 31st December 2015

Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad



House of the People of the Federal
Republic of Somalia
Committee on , Finance, Planning
and Financial Oversight of Public
Institutions



جمهوريه الصومالي الفدراليه
جلس الشعب
جنة الشئون ، المالية، التخطيط، ومحاسبة
بنات الدولة

Golaha Shacabka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Guddiga, Maaliyadda, Qorshaynta iyo La-Xisaabtanka Hay'adaha Dowladda

Ref:GMQ/BFS/12/147/2015

15 / 12 / 2015

Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka F. Soomaaliya Muqdisho

Xubnaha Golaha Shacabka Baarlamaanka F. Soomaaliya Muqdisho

Ujeeddo: Warbixinta Miisaaniyadda 2016

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal

Annagoo gudanaynaa waajibaadka xeeriga ah ee Baarlamaanku noo agmaday,

Waxaan halkan si xushmad iyo qadderin leh idiinku soo gudbinaynaa warbixinta Guddiga Maaliyadda ee Miisaaniyadda qaranka ee 2016.

Miisaaniyadda oo Guddiga la soo gaarsiiyey bartamihii bishan December 2015ka, wuxuu hawshiisa ku gebagabeeeyey muddo 10 maalmood ah.

Waxyaabihii Guddigu dib u egista ku sameeyey waxay ku lifaaqan yihiin warqaddan gudbinta ah.

Bacdamaa Miisaaniyaddu ay ka mid tahay waajibaadyada Golaha Shacabka kuwa ugu muhiimsan, sannadkuna dhamaad yahay.

Waxaan golaha Sharafda leh si xushgmad leh uga codsanaynaa in la Miisaaniyadda la ansixiyo, si hawsha qaranka habsami ugu socoto.

Xil. Samaan Maxamed Sh. Daahir

Guddoomiyaha Guddiga

1748
29-12-15
~~Amidhak~~

House of the People of the Federal
Republic of Somalia
Committee on Budget, Finance,
Planning and Financial Oversight
of Public Institutions



الفدرالية الصومالي جمهورية
الشعب مجلس
التخطيط، المالية، الميزانية، الشئون لجنة
الدولة هيئات ومحاسبة

Golaha Shacabka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorshaynta
yo La-Xisaabtanka Haay'adaha Dowladda

WARBIXINTA GUDDIGA MAALIYADDA
EE ODOROSKA MIISAANIYADDA
QARANKA, SANNADKA 2016

29th December 2015



A handwritten signature is placed over a circular official stamp. The stamp contains the text "GUDDIGA MAALIYADDA & QORSHAYNTA", "FINANCE & PLANNING COMMITTEE", "OF THE SOMALI FEDERAL PARLIAMENT", and "MADRASAH FEDEERAALKA SOOMAALIA".

B. Hordhac

Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee 2016ku waa Miisaaniyad Sannadeedkii Afraad ee Guddiga Maaliyaddu falanqeeyo muddadii uu jiray Baarlamaanka 9aad ee Jamhuuriyadda Feferaalka Soomaliya. Guddiga Maaliyaddu isagoo uga wakiila ah golaha Shacabaka sida ku xusan qodobka 67 ((7) xeerhoosaadka golaha shacabka arrimaha miisaaniyadda.

Isagoo si guud oo dhammeystiran u eegaya Qoondada Miisaaniyadda kana fiirinaya dhinacyada; (b) Siyaasadda Qorshaha Miisaaniyadda,(t) Xaqiqada dhabta ah ee ay ku dhisantahay Miisaaniyaddu xisaab ahaan iyo sharci ahaanba (j) Hubinta isu dheelliyirnaanta Dakhliga ka soo xeroon kara ilaha dhaqaale ee ku talogalka Miisaaniyaddu ku qotomo iyo (x) Kharashyada Qorsheysan ee Miisaaniyadda wuxuu dulmar guud ku sameeyey kana baaraandegey Oddoroska Miisaaniyadda oo loo soo gudbiyey Golaha laguna wareejiyeye Guddiga 15/12/2015.

Guddigu isagoo ay culeysweyn ku hayso dibudhaca joogtada ah ee soo gudbinta Miisaaniyadda ee dhinaca Xukuumadda isla markaana dareensan masuuliyadda baaxadda leh ee ka saaran baajinta dhibaatada ka dhalan karta dibu dhaca Miisaaniyad Sannadeedka 2016ka, wuxuu xil iska saarey inuu muddadaa ciriiriga leh ku soo gudbiyo warbixintan iyo falaqaynta miisaaniyad Sannadeedka 2016ka.

1. Shuruucda iyo Siyaasadda Miisaaniyadda

Sida habdhaqanka maaliyadeed ee soo gudbinta Miisaaniyada Guud ee Qaran caadada u ah waa inay Xeerka Miisaaniyadda iyo lifaaqyada qoondada miisaaniyaddu koobayaan warbixinno dhammeystiran oo iftiiminaya dhinacyada kala duwan dhaqaalaha dalka guud ahaan iyo qoondada Miisaaniyadeed ee dalka si ay fududaato in si sahan loogu fahmo miisaaniyadda, arrimahaas oo ay ugu muhiimsan yihiin;

1. Shuruucda ay ku dhisan tahey Miisaaniyaddu
2. Faafaahfahin cad oo Dakhliga iyo Kharashka ah
3. Sababaha korodh kasta ama dhimis kasta oo dhakhli ama kharash ee cusub
4. Warbixinta Daymaha qaranka iyo faahfaahintooda
5. Warbixinta deeqaha Qaran ee la filayo in la helo
6. Warbixinta dhigaalka/Keydka qaranka
7. Warbixinta Mashaariicda Horumarineed ee dalka ee qorsheysan.

2. Qodobo Xeer ka Qoondada Miisaaniyadda

Xeerka Qoondada ayaa dib loo eegey waxaana la is la gartey guddiga iyo Wasaaradduba in Qodobada qaarkood toosin lagu sameeyo. Haddaba meelaha wax laga beddeley waxaa ka mid ah kuwan hoos ku cad.

- a. **Qod.2.3aad, Faqrada 1aad:** wuxuu Wasiirku; (B) Kala wareejin karaa kharashka miisaaniyada joogtada ah walax walax hadii ay isku madax yihiin. (T) Kala wareejin karaa miisaaniyada mashruuc kuna wareejin karaa mashruuc kale kadib markii hay'ada



- mashruucaasi hore ugu qoondaysnaa waafaqdo Ra'iisul wasaaruhuna rasmi ahaan u oggolaado."
- b. **Qod2.3aad, Faqrada 2aad:** Wasiirku wuxuu u xilsaari karaa mas'uul xafiiska dawladeed ee ku habboon oo ka tirsan Wasaaradda Maaliyadda inuu meel mariyo ama fuliyo xilka iyo awoodda lagu siiyey qodob-hoosaadka koowaad ee kor ku xusan".
 - c. **Qod.2.4aad Faqradiisa 1aad:** Wasiirku wuxuu u wareejin karaa miisaaniyada joogtada ah ee loo qoondeeyey xafiis dawladeed xafiis kale, kadib markii la xaqijiyo in xafiiska loo qoondeeyey miisaaniyada aanu wada isticmaali karin hay'ada loo qoondeeyeyna waafaqdo Ra'iisul wasaaruhuna oggolaado".
 - d. **Qod.2.4 Faqrada 2aad:** Wasiirku wuxuu amri karaa in miisaaniyada mashaariicda ee loo qoondeeyey xafiis loo wareejiyo xafiis kale, kadib markii la xaqijiyo in miisaaniyad yaraanta mashaariic xafiis laga dabooli karo miisaaniyada mashaariic oo loo ansixiyey sanadkaas xafiis kale oo dawladeed kadib markii hay'ada kharashka laga wareejinayo waafaqdo Ra'iisul wasaaruhuna oggolaado".
 - e. **Qod 2.5aad Faqrada 1aad:** Wasiirku wuxuu kadib oggolaanshaha golaha wasiirada amri karaa in miisaaniyada kaydka lama filaanka loo wareejiyo loona isticmaalo kharash xaalada degdeg ah, kadib markii ay dhacaan hawlo gurmud degdeg ah oo u baahan kharash degdeg ah oo aan baahidooda horay u muuqanin waqtiga diyaarinta miisaaniyada sanadka. Kadib markii wasiirku amro soo wareejinta kharaska kaydka lama filaanka waxaa lagu wareejinayaay hay'ada ka mas'uulka ah. Wasiirka ayaa si joogta ah u siin doona Golaha Shacabka warbixin ku aaddan kharashka laga wareejiyey kaydka lama filaanka."
 - f. **Qod.2.5aad Farqad cusub oo 2aad:** Kharashka kaydka lama filaanka waxaa keliya oo loo isticmaali karaa xaalad degdeg ah sida fatahaado, abaro, cuduro dilaacay IWM, looma isticmaali karo baahida kharashka caadiga ah ee xafiisyada dowladda".
 - g. **Qod.3.7aad:** lacagta aan la isticmaalin waxaa gebi ahaan meesha laga saaray farqadiisa 2aad ee qodobka oo u qornayd sidan: "Iyadoon waxba loo dhimayn qodob hoosaadka 1aad ee qodobkan,ayaa waxaa hadhaaga miisaaniyada aan la isticmaalin ee deeqda iyo deynta lagu haynayaa miisaaniyada duuduubka ah, si loo isticmaalo marka loo arko iney tahay lagama maarmaan"
 - h. **Qod. 3.1aad:** Ee kharash bixibta waxaa lagu daray hal farqo cusub oo ku jirta kaalinta 4aad ee mudnaanta oo u qoran "Haddii ay timaaddo hoos u dhac dhinaca dakhliga ah ama deeqaha wasaaradduna awodi weydo bixinta dhammaan kharashaadkii billaha ah ee kutalagalka miisaniyadda 2016, waxaa mudnaanta kharash bixinta loo raacayaa sida ay u kala horreeyaan ee hoos ku taxan:
 1. Raashinka iyo gunnoyinka ciidamada qalabka sida.
 2. Mushaharooyinka/gunooyinka shaqaalaha Rayidka ah
 3. Gunnada Xildhibaanada iyo gollaha wasiirada
 - 4. Mushaharka iyo gunnoyinka curaarta ku jira ee kasoo wareegay miisaaniyada sanadkii hore.**

5. Khidmada maaliyadu ku shaqayso
6. Adeega iyo agabka xafiisyada dowladda
7. Currarta iyo qaamaha la hormarsaday

3. Muuqaalka Guud ee Miisaaniyadda

Guddiga maaliyadda iyo Miisaaniyadda ee Golaha Shacabku, isagoo maskaxda ku haya arrimaha kor ku xusan, tix gelinayana duruufaha dalku ku sugar yahey wuxuu muddo todobaad ah ku hawlanaa dib u eegista iyo ka baaraandegga Miisaaniyadda Qaranka ee Sannadka 2016, taasi oo muujinaysa muuqaalka hoose.

Sida uu tusayo Jaantuska1, ee kutala galka Miisaaniyadda 2016 ka oo dhan **USD 246,307,948** waxaa ka muuqda in Miisaaniyaddu wali si weyn ugu kooban tahey kharashyada Adeegga Maamulka iyo Diffaaca taa soo looga qoondeeyey miisaaniyadda joogtada ah qaddar dhan **USD223.2** malyan kana ah **90.1%**. Halka hadhaaga oo dhan USD 23.1 milyan oo u dhiganta 9.% Miisaaniyadda loogu talo galeysteen mashaariicda horumarinta.

Jaantuska 1aad: Muuqaalka Guud ee Miisaaniyadda Sannadka 2016

SOO KOOBIDDA MIISAANIYADDA GUUD EE SANADKA 2016-KA			
Madaxa	HAY'ADAHA	Miisaaniyadda Kutalagalka 2016 (Millions) in USD	Boqolkiiiba% Katahey Miisaniyada
100	Hay'adaha Adeegga Maamulka Guud	152.9	62.1%
200	Hay'adaha Adeegga Difaaca Iyo Amniga,	65.9	26.8%
300	Hay'adaha Adeegga Dhaqaalaha	20.8	8.4%
400	Hay'adaha Adeegga Bulshada	6.6	2.7%
Wadarta guud		USD 246.3	100%

T. Falanqaynta iyo Talo Bixinta Guddiga Maaliyadda

Guddiga Maaliyaddu waxuu kulan falanqayn ah kala yeeshay Madaxda Wasaaradda Maaliyadda oo uu hoggaaminayey Wasiirka wasaaradda maaliyadda. Dhinaca kalena waxey warbixinno iyo cabashooyinba ka dhegeysteen qaybo ka mid ah masuuliyiinta hay'adaha dawladda.

Haddaba kaddib markii si qoto dheer loo falanqeeyey loogana baaraandegey kutalagalka Miisaaniyadda ee Dakhliga iyo Kharashka Sannadaka 2016ka waxaa u soo baxdey arrimaha hoos ku qoran oo uu guddigu ka tilmaan bixiyey.

1. Dakhliga Miisaaniyadda

Dakhliga miisaaniyaddu wuxuu aalaaba ka kooban yahey cashuuraha, takaaliifaha iyo khidmadaha kala duwan ee sharcigi jideeyey, kaalmooyinka ammaba deeqaha, dakhliga kale ee ilaha filiqsan ka soo baxa, daymaha qaranku soo deynsado gudaha iyo dibeddaba, haraaga miisaaniyadihii hore haddii uu jiro iyo dakhlikasta kasta oo la filayo in si sharciga waafaqsan ay ugu soo kordho miisaniyadda.

- a. Guddigu markii uu eegey dakhliga gudaha ee miisaaniyadda waxa u muuqdey inuu sameeyey isbeddel korodhsimo ku dhow USD25.3 malyan, (22%) marka la barabar dhigo sannadkii hore. Hase ahaatee waxaa hoos u dhac uu ku yimid deeqaha dibedda kadib markii ay joogsatey kaalmooyinkii labada dhinac ahaa ee dawladdu heli jirtay ammaba filan jirtay. Guud ahaan miisaaniyad sannadeedka (2016) dakhli ahaan waxey ka yartahay middii ku talogalkii sannadkii hore (2015) kii, waxayna inta badan ku saleysantahay miisaaniyad ku celintii sannadka 2015 ee ay sababtey isdhinkii dakhliga. Taasi oo ka timiddey in ay is dhimeen deeqihii la filayey lagana saarey waxii aan heshiis dhab ah lahayn, si aaysan u dhicin xaaladdii isdhinka weyn lahayd ee deeqahii sannad miisaaniyadeedkii ka horreeyey. Sidaa darted Guddigu waxuu ku adkaystey in deeqaha aan lahayn heshiisyo dhab ah oo qoraalkiisa la hayo aanan miisaaniyadda lagu soo dari.
- b. Dakhliga guduuhu si joogto ah ayuu u kordhayey iyada oo ay ka timid in wasaaraddu u kordhisey ururinta cashuuraha barriga iyo dakhliga dekedda oo kordhey, 84.3 malyan (2014), 127 malyan (2015) sidaa darteed ku talogalka sannad, miisaaniyadeedka cusub sida kor ku xusan.
- c. Waxaa kale oo guddiga u soo baxdey in Cashuurta dadban ee ku talogalka sannadka 2015 ka hoos marey intii lagu talo galay inay ka soo xerooto shirkadaha xawaaladaha, 4.8 malyam (2014), 22 malyan (015), 12 malyan (2016). Waxaa kale isbeddelku ka yimid qaladaad *madbaci* ah oo ka soo baxay wadarta xisaabaadka gaar ahaan shirkadaha biyaha, qidmadaha maamulka iyo Socdaalka gaadiidka oo ku talogalkii 2015 ku uu san sax ahayn balse tirada danbe ee sannadakani tahay inta ku jaan go'an waxa dhab ahaan la filayo.
- d. Dakhliga Sannadakan wuxuu ku qotomaa in cashuuraha qaarkood kordhi doonaan, qaddarka cashuurta oo meelaha qaarkood la kordhiyey iyo ururinta cashuuraha oo hawlalkooda la balaarinayo darteed sida Cashuuraha Isgaarsiinta, warshadaha korontada , cashuurta jaadka/qaadka iyo cashuuraha dadban sida ku xusan Qoondada Miisaaniyadda.
- e. Ilaha dakhliga waxaa kale oo kaalinweyn kaga jira deeqaha dibedda in kabaden USD108.7 malyan 44.1% ayaa ah kaalmo dibadeed taasi oo ka imaneysa sanduuqyo horumaneed oo dhinacyo badan leh iyo dawladda Turkiga intabadanna uu maamulayo bankiga Adduunku (World Bank). Waxaa kale muhiim ah in la sheego lacagaha deeqaha ah qayb weyn oo kamid ahi lagu tilmaami karo Miisaaniyad Horumarineed oo ku jihaysan mashaariic horumarineed oo gaar ah.

- f. Miisaaniyaddu waxay xuseysaa in cashuuro ka soo xeroonayaan meelaha cusub oo hore aanay cashuuri ka soo xeroon jirin amma ku jirin liiska cashuurbixinta kuwaas oo ay ka mid yihiin Cashuuraha Macaashka, shirkadaha, warshadaha korontada, Isbitaalada iyo waxbarashada, dhaqdhaqaaqa Baabuurti iwm.

2. Kharashka Miisaaniyadda

- a. Dhinaca Kharash bixinta dawladda wuxuu guddigu falanqeyn dheer ka yeeshay duruufaha adag ee ka horyimid dheelitirka Miisaaniyada iyolsbeddelada lagu Sameeyey iisaaniyadda.
- b. Sida ay guddiga ugu warbixisey Wasaaraddu marlkii golaha Wasiiradu ansixinayey Miisaaniyadda 2016 ayaa shardiga ah in la dhammeystiro dhammaan xogaha qabyada ah iyada yabooha deeq bixiyayaasha ee kutalogalka miisaaniyad Sannadeedka 2016 iyo heshiisyada lagalay yimaadeen xilliyo kala duwan. Sidaa darteed ay miisaaniyadda isbeddello lagama maarmaan ahi ku dhacay.
- c. Sidoo kale markii guddiga iyo wasaaraddu fadhiyo badan ka yeeshen falanqaynta miisaaniyadda iyo isbeddellada ku iman kara iyadoo mudnaanta la siinayo meelaha lagama maarmaanka waxaa soo ifbaxay talooyin badan oo loo arkay in ay Muhiim tahay in lagu kordhiiyo Miisaaniyadda 2016ka. Haddaba meelaha uu wax ka beddelku saameeyey ayadoo aan laga baxayn xayndaabka guud ee odoroska dakhliga Miisaaniyadda 2016ka waxaa lagu soo koobey dhinacyada laga dhimay iyo meelaha lagu kordinayo iyadoo la eegayo mudnaanta iyo baahida hay'adaha gaar ahaan kuwa cabashada soo gaadhsiiyey Xukuumadda iyo Guddiga Maaliyadda ee Baarlamaanka wadajirna loo garaabey cabashadooda.
- d. Isbeddelada Miisaaniyaddu wuxuu badiba ka yimid dhinaca ciidamada qalabka sida oo Miisaaniyaddii ku talogalkii hore wax weyni iska beddeleen. Kolkii la diyaarinayey Miisaaniyadda 2016ka ayaa siyaasad ahaan waxaa loo qaataay in la mideeyo dhammaan mushaarka iyo qarashaadka Ciidamada qalabka sida hadey ahaan lahayd Gudaha ama Deeqaha Dibadda waxaa wadatashi dheer lala galay beesha caalamka ee deeqda Dowladda Soomaaliyaa waxaa soo baxday in deeq bixiyaashu bixinayaa Ciidamada Qalabka Sida mushaarkooda inta badan balse qaarkood lagu bixin doono si toos ah oociidamada la siin doono iyadoon la soo marsiin qasnadda dawladda. Sidaa darteed waxaa lagama maarmaan noqoteey in miisaaniyaddii loo qoondeeyey ciidamada qalabka sida qayb ahaan oo ay baahidoodii dabooshey deeqaha tooska ah ee saaxiibbada Soomaaliya loo wareejiyo meelaha isdhinka baahida badani badani ka jiro. Sidaa darteed waxaa dib loo meeleyey miisaaniyadda 2016-ka oo laga soo jaray Ciidamada qalabka sida taasi oo dhan US\$ 12.7 malyan waxaana lagu kala meeleyey sidan:



Jaantuska 2aad:Wax ka Beddelka Miisaaniyadaha Hay'adaha Qaarkood

Meelaha Isbeddellada Kororsiimadu Saameeyeen			
TN	Hay'adaha	Bil	Sannad 2016
1	Ciidanka Booliska Somaliyeed	59,000	708,000
2	Wasaaradda Amniga Qaranka	37,500	450,000
3	Wasaaradda Gaashaandhigga	2,000	24,000
4	Wasaaradda Maaliyadda	-	1,000,000
5	Jaamacadda Ummadda Soomaliyed	30,000	360,000
6	Xafiiska Ra'lisal Wasaaraha	10,000	120,000
7	Wasaaradda Kallumeynsiga	8,000	96,000
8	Keydka kabidda Miisaaniyadda	100,900	1,187,604
9	Hantidhowrka Guud	30,000	360,000
10	Guddiga Dooroshooyinka	30,000	360,000
11	Guddiga Xuduudaha	20,000	240,000
12	Hay'adda Cilmi baaadhista badda	10,000	120,000
13	Wasaaradda Caafimaadka	8,085	97,020
14	Hay'adda Naafada Ciidamada	10,000	120,000
15	Kaalmada Gobolada	400,000	4,800,000
16	Curaarta (Mushahar iyo gunno)		2,000,000
17	Xubnaha Baarlamanka	15,000	180,000
18	Wasaaradda Dastuurka		109,800
19	Mashruuca Horumarinta Xeebaha		104,340
20	Xafiiska Baarlamaanka		248,040
	Wadarta Guudd Isbeddellada ka dhashey		USD: 12,684,804

3. Miisaaniddaa Mashaariicda Horumarinta.

Jaantuska 3aad : Miisaaniyadda Horumarinta

Mashaariicda la qoondeeyey	Qoondada 2016
Special Financing Facility (SFF)	USD17,000,000
Public Finance Management (PFM)	USD1,214,000
Economic and Financial Governance (EFG)	USD250,000
Recurrent Costs and Reform Financing Project (RCRF)	USD200,000
Capacity Injection Project (CIP)	USD380,000
Information Communication and Technology Sector Support (ICT)	USD3,100,000
Wadarta guud ee Miisaaniyadda Mashaariicda	USD23,144

4. Talooyin iyo Soo Jeedimo Guud:

- a. Erey Bixinta Erayada qaarkood iyo Xarfaha la soo gaabshey ee lagu Iisticmaalay Qoondada miisaaniyadda ma cadda waxaa loo baahanyahay in si sharci ah oo macno faahfaahfaahsan leh lasiyo.
- b. Si loo sii kobciyo dhaqaalahaa dalka loona ilaaliyo hufnaanta maaliyadda guddigu wuxuu aad u adkaynayaa dhaqangelinta qaraaradii Golaha Shacabaka ee ku wajahnaa hagaajinta hawlaha dakhliga dawladda
- c. Guddigu isagoo tix raacaya soo jeedimihii sii hore 2015kii, wuxuu markale talo ahaan ku soo jeedinayaa in iney Xukuumaddu diyaariso qorshe qaran oo horumarineed oo ku aaddan miisaaniyadda kaalmada ah ee beesha caalamku ku deeqdey horumarinta dalka iyo in haba yaraatee miisaaniyadda gudaha looga qoondeeyo qayb horumarineed.
- d. In mashaariicda horumarinta lagu saleeyo baahiyaha mudnaanta leh, looguna qaybiyo si caddaalad ah gobollada iyo degmooyinka dalka, iyadoo fursad loo siinayo xildhibaannada qaranku inay qayb ka ahaadaan talada mudnaanta mashaariicda laga fulinayo deegaan doorashadooda.
- e. Guddigu wuxuu marar badan soo jeediyeey in sida caadiga ah musharka shaqalaha dawladda la bixiyo dhammadka bilkasta kana dib dhicin usbuuca koowaad ee bisha xigta, hase ahaatii laguma dhaqmin, sidaa darteed guddigu wuxuu markale adkaynayaa in wasaaradda waajib sharci ahi ka saaranyahay bixinta xuquuqda maqan ee mushahar, gunno iyo dayn ba leh sida ku jirta curaarta Miisaaniyadda 2016.
- f. Guddigu waxa kele oo uu galaha u soo jeedinayaa in wasaaradda la faro diyaarinta xeer qaran oo lagu saleeyo gunnooyinka xilka ee Siyaasiinta iyo sahaydsafar ta (DSS).
- g. Waxa kale oo guddigu soo jeedinayaa in sida ugu degdegsan loo dhammeystiro shuruucda maaliyadda ee dhiman sida; Sharciga maamulka Maaliyadda dawladda, sharciga tariffooyinaka, iyo shariqiaga maamulaka Cashuuraha (Revenue Bill),

5. Gabogabo

Guddigu isagoo ku bogaadinaya Golaha Shacabka sida wanaagsan ee ay u meel mariyeen shuruucdii maaliyadeed ee guddigu soo hordhigay Golaha, wuxuu ka rajeynayaa golaha sharafta leh isagoo gudanaya waajibaadkiisa dastuuriga ah isla markaana xeerinaya duruufaha marxaladda dhaqaale ee dalku marayo ansixiyaan Miisaaniyadda Sannadka 2016 .

-----Dhammaad-----





The Federal Republic of Somali
Ministry of Finance
Office of the Minister

109/10/699

Ku:-Guddoomiyaha Golaha Barl. DFS =Muqdisho=

Ujeeddo:-Ballan Qaad.

Mudane Guddoomiye,

Waxaan kula socodsiinaynaa in la gaari waayay miisaaniyadda 2015 waxaana muuqata in mushaarooyinka iyo raashinka ciidamada wax ka harayaan. Haddaba wuxaan ballan qaadaynaa in aan horraanta sanadka 2016 bixin doono mushaarooyinka ciidamada, shaqaalaha rayidka ah, siyaasiinta iyo raashinka ciidamada ee dhiman laguna bixin doono deeqo laga sugayo beesha caalamka.

Sidoo kale waxaa jira dayman si guud loogu leeyahay Dawladda oo aan ku jirin miisaaniyadda waxaana loo sameeyay guddi ka tala bixiya sharciyadda daymahaas waxayna kala yihiin.


- 1) Wasaaradda Maaliyadda
- 2) Hantidhowrka Guud ee Qaranka
- 3) Xisaabiyaha Guud ee Dawladda

Sidaas darteed anaga oo ballanqaadayna arrimaha kor ku xusan waxaan idinka rejeynaynaa inaad gacan naga siisaan adinka oo mahadsan.

Mahadsanid

M.
farkeeh

Maxamed Aadan Ibraahim
Wasiirka Maaliyadda



lifaaq Miisaaniyadda

Hussein

31/12/2015

Lifaaq- Miisaaniyadda 2016-ka

Anagoo tixraacayna kulankii guddiga maaliyadda ayaa waxaan jecelnahay in aan idin la wadaagno dhamaan deymaha lagu leeyahay dowladda hadey ahaan lahaayeen kuwo ku jiray miisaaniyadda ama ka baxsan waxayna kala yihin sida hoos ku lifaaqan:-

A- Curaarta Ka Hartay Miisaaniyadda 2015		
Tr.	Faah-Faahin	Cadadka Lacagtga
1	Mushaar & Gunno Shaqale iyo Wasiiro	\$ 13,668,712.00
3	Mushaar Ciidanka Aslubta	\$ 975,000.00
4	Mushaar Ciidanka Xoogga	\$ 6,490,960.00
5	Mushaar C. Nabadsugidda	\$ 914,666.00
6	Mushaar & Gunno Safaaradaha	\$ 622,342.00
7	Raashin C. Aslubta	\$ 389,046.00
8	Raashin C. Xoogga	\$ 1,238,461.00
9	Raashin & Howlaha Booliska	\$ 1,008,000.00
10	Raashin C. Nabadsugidda	\$ 536,200.00
	Wadarta Guud	\$ 25,843,387.00

B- Deymaha Loo Hayo Heshiiska		
Tr.	Faah-Faahin	Cadadka Lacagtga
1	Dahabshiil	\$ 3,000,000.00
2	Salaama Bank	\$ 1,200,000.00
	Wadarta Guud	\$ 4,200,000.00

C- Deymaha u Baahan Hubinta		
Tr.	Faah-Faahin	Cadadka Lacagtga
1	Deymaha Guud (Qiyaas)	\$ 20,000,000.00
	Wadarta Guud	\$ 20,000,000.00

F.G.

Daymaha waxaa loo bixin doonaa sida ku cad qoondada miisaaniyadda marka dakhli nagu filan la helo.

Abdulely

*1756
31/12/2015
Abdulely*



Tixraac: XRW/0000 607 /10/2015

Taariikh: 29/10/2015

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka JFS

=Muqdisho=

Og: Madaxweynaha JFS

=Muqdisho=

Ujeeddo: **Soo Gudbin 'Miisaaniyadda Sanadka 2016'**

Mudane Guddoomiye,

Tixraac go'aanka Golaha Wasiirada ee summaddiisu tahay SHGW.00.40.10.15 ee 29/10/2015, kuna saabsanaa ansixinta 'Miisaaniyadda Sanadka 2016' oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Haddaba, Mudane Guddoomiye, waxaan halkan idinkugu soo gudbinaynaa 'Miisaaniyadda Sanadka 2016' si aad uga gudataan xilkiina Dastuuriga ah, waxa aan idinka codsanaynaa in aad fududaysaan ansixinta '**Miisaaniyadda ujeeddada sare ku xusan**' maadaama baahi weyn loo qabo dhaqan-gelinteeda.

F.G: Arag Lifaqa

Naga guddooma salaan diirran.



Mudane Cumar Cabdirashiid Cali Sharifarka

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F. Soomaaliya



Tixraac: XRWI 000 939 /10/2015

Taariikh: 29/10/2015

Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS
Og: Guddoomiyaha Golaha Shacabka JFS
Og Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=

Ujeeddo:- Go'aan Gole- "Ansixinta Miisaaniyadda 2016"

Ra'iisul Wasaaraha Xukujumadda JFS,

Markuu arkay: Qod. 99^{sad} (a), (b) iyo (d) ee Dastuurka JFS.

Markuu arkay: Qod. 100^{sad} (a) iyo (d) ee Dastuurka JFS.

Markuu arkay: Soo jeedinya Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

Markuu arkay: Go'aanka Golaha Wasiirada ee summaddiisu tahay
SHGW.00.40.10.15 ee 29/10/2015, kuna saabsanaa 'Ansixinta
Miisaaniyadda 20126, oo Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Markuu tixgeliyey: Baahida loo qabo gudbinta "Miisaaniyadda 2016"

Wuxuu meel-mariyey

Qodobka 1^{sad}

Go'aanka Golaha Wasiirada ee summaddiisu tahay, SHGW.00.40.10.15 ee 29/10/2015,
kuna saabsanaa 'Ansixinta Miisaaniyadda 20126, oo Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Qodobka 2^{sad}

Shuruudaha Ku Xiran Ansixinta Miisanayadda 2016

- A- In baahida la soo hadal qaaday ee muhiimka ah laga saxo Miisaaniyadda 2016.
- B- In haddii dakhligu kordho lagu xuso miisaaniyadda oo loo kordhiyo Wasaaradaha, iyadoo muhiimadda baahidooda la eegayo.
- C- In Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka lagu wareejiyo **Madax-xigaha** deeqaha Gobollada.

Oodobka 3nd

In si deg deg ah Golaha Shacabka loogu gudbiyo "Miisaaniyadda 2016" si ay uga gutaan waajibaadkooda Dastuuriga ah.



Mudane Cumar C. C. Sharmarke
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

Ref: MOF/OM/004715

Taariikh: 29/10/2015

Ku: Mudane Cumar Cabdirashid Sharmaarke
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS
=Muqdisho=

Ujeedo: Soo Gudbin Miisaaniyadda sanadka 2016

Markaan arkay	Qodobka 99aad (d) ee Dastuurka JFS
Markaan arkay	Qodobka 102aad ee Dastuurka JFS
Markaan arkay	Qodobka 4aad ee Xeerka Maamulka Maaliyadda

Mudane, waxaan halkan kugu soo gudbinaya miisaaniyadda sanadka 2016. Xeerka Maamulka Maaliyadda wuxuu dhigayaa in miisaaniyadda sanadlaha ah loo gudibyo Golaha Shacabka inta ka horeysa 31da Oktoober ka dib marka Golaha Wasiiradda ansaxiyo.

Sidaa awgeed, Mudane Ra'iisul Wasaare, waxaan si qadarin iyo xushmad leh kaaga codsanayaa in miisaaniyadda 2016 u ogolaato in uu u gudbo golaha wasiirada si loo ansaxiyo.

Mahadsanid



Maxamed Aden Ibrahim

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



**XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA
2016-KA**

TIRSI 00008

HALKU-DHIGGA SANNADKAN 2016-KA

“KU TIIRSANAANTA DHAQAALAHEENA

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2016-KA

Tusmada buugga

BAYAAN TIRSI 00008/2016	2
1. QAYBTA KOOWAAD GUUD AHAAN	2
CINWAAN GAABAN	2
1.1 QEEXIID	2
1.2 WADARTA MIISAANIYADDA LA QOONDEEYEEY.....	3
2 QAYBTA LABAAD	3
2.1 AWOODAHA XAFIISYADA DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA.....	3
2.2 MIISAANIYAD WAREEJIIN	4
2.3 MIISAANIYAD WAREEJINTA XAFIISKA DHEXDIISA	4
2.4 MIISAANIYAD WAREEJINTA XAFIISYADA DHEXDOODA	4
2.5 WAREEJINTA MIISAANIYADDA KAYDKA.....	4
2.6 MIISAANIYADDA KABISTA	5
2.7 CURAARTA.....	5
2.8 QAAMAHAA.....	5
3 QAYBTA SEDEXAAD	5
3.1 MUDNAANTA KHARASH BIXINTA.....	5
3.2 DHITO	5
3.3 LACAGTA LAGA BIXIYO MIISAANIYADDA DUUDUUBKA	6
3.4 XADDIGA KHARASH BIXINTA	6
3.5 GEDAB.....	6
3.6 LACAG BIXINTA AGABKA IYO ADEEGGA.....	7
3.7 LACAGTA AAN LA ISTIC-MAALIN.....	7
3.8 WARBIXIN XISAABEEDKA	7
4 QAYABTA AFRAAD.....	8
4.1 QOONDAYNTA MIISAANIYADDA XAFIISYADA DOWLADDA.....	8
4.2 MUDDADA DHAQAN-GALKA.....	8
5 LIFAAQYADA MIISAANIYADDA 2016-KA.....	9
5.1 Soo KOOBIDDA DAKHLIGA IYO KHARASHKA MIISAANIYADDA SANADKA 2016	9
5.2 FAAH-FAAHINTA DAKHLIGA GUUD DOWLADDA Ee MIISAANIYADDA 2016-KA	10
5.3 QOONDADA HAY'ADHA Ee MIISAANIYADDA 2016-KA	11
5.4 Soo KOOBIDDA KUTALGALKA MIISAANIYADDA 2016-KA.....	13
5.5 FAAH-FAAHINTA KUTALGALKA MIISAANIYADDA 2016-KA Ee HAY'ADHA DOWLADDA.....	15
5.6 KUTALGALKA MUSHARAADKA SHAQAALAHAD DOWLADDA Ee MIISAANIYADDA 2016-KA	34
5.7 KUTALGALKA GUNNOOYINKA MAS'UULIYIINTA IYO SHAQAALAHAD DOWLADDA Ee MIISAANIYADDA 2016-KA	36

BAYAAN TIRSI 00008/2016

XEERKA DHAQANGELINTA MIISAANIYADDA SANADKA 2016 EE JAMHUURIYADDA FEDARAALKA SOOMALIYA.

Maadaama, uu qeexayo Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya in uu Golaha sharci dajintu ansixiyo, dhaqan galiiyana miisaaniyadda Sanadlahaa ah.

Maadaama, ay tahay lagama maarmaan in la ansixiyo, lana qaybiyo Miisaaniyadda Dowladda Fedaraalka ee Soomaaliya si ay ugu fuliso hawlaheeda sanad xisaabeedka 2016.

Haddaba, iyadoo laga duulayo qodobka 124rd xarafkiisa (a) ee Dastuurka KMG ah Dowladda Federalka Soomaliya, ayaa Golaha Shacabku ansixyey Miisaaniyadda 2016-ka ee faahfaahinteedu ku lifaaqan tahay halkan iyo xeerka dhaqangelinta Miisaaniyadda ee qodobadiisu hoos ku taxan yihiin:-

1. Qaybta Koowaad

Guud Ahaan

Cinwaan Gaaban

Yeerkana oo ka kooban bayaanno qodobeysan, faahfaahinta Miisaaniyada ayaa waxaa lagu magacaabay “Xeerka Dhaqangelinta Miisaaniyadda Sanadka 2016-ka ee tirsi 00008/2016”

1.1 Qeexiid

Haddii aan si kale loogu fasirin yeerkana dhaxda, ereyada soo socda waxay yeelanaya macnaha mid walba ku hor qeexan:-

1. “Qoondayn” waxaa loo la jeedaa amar kasta oo uu Golaha sharci dajintu ku amrayo in lacag laga bixiyo Miisaaniyadda duduubka ah.
2. “Ansixin” waxaa loo la jeedaa ayidaadda uu ayido wasiirku, Miisaaniyadda ku diyaarsan walax kharasheedka qaab wafaqsan qoondo Miisaaniyadeedka uu Golaha sharci dajintu sameeyey.
3. “Kharashka Mashaaricda” waxaa loo laa jeedaa kharashka lagu bixiyo iibka iyo dayactirka hantida joogtada ah, oo ay ku jiraan kharashyada ay ka mid yihin kuwa tababarada iyo adeegyada latalinta.
4. “Gedab “waxaa loo la jeedaa waajibaadka noqonaya qaan hadiiba ama marka shuruudaha heshiis jiray ama sharci la fuliyo.

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2016-KA

5. "Wasiir ama wasaarad" waxaa loo laa jeedda wasiirka maaliyadda ama wasaaradda maaliyadda hadba sida ay tahay.
6. "Xafiis dawladeed" waxaa loo la jeedaa xafiis kasta oo ka mid ah Dowladda Federalka Soomaaliya oo guud ahaan ama qayb-ahaan looga qoondeeyo miisaaniyadda Dowladda ee bayaankan lagu xeeriay.
7. "Kala wareejin" waxaa loola jeedaa ogolaanshaha kala warejinta Miisaaniyadda la qoondeeyey, lagana wareejiyo cinwaan, farac cinwaan mashruuc ama walax kharasheed laguna wareejiyo mid kale.
8. "Qaansheegatada" waxaa loola jeedaa shirkadaha ama shaqsiyaadka hay'adaha dowladda siiya adeeg ama agab.

1.2 Wadarta Miisaaniyadda La Qoondeeyey

Miisaaniyadda Dowladda Fedaraalka Soomaaliya ayaa si ay u meel-mariso hawlahu u qorshaysan Sanad misaaniyadeedka ka billaabma 1-da Janaayo 2016-ka kuna dhamaada 31, December 2016-ka, ayaa sida hoos ku xusan looga qoondeeyay dakhliga khasnadda iyo lacagaha kale ee Dowladda, sida lagu qeexay jadwalkan. Wadarta Miisaaniyadda ee loo qoondeeyey Miisaaniyadda Joogtada iyo tan Raasumaalka ah ayaa ah sidan hoos ku xusan:-

B) Kharashka Joogtada ah US\$ 223,163,948

T) Kharashka Raasumaalka ah US\$ 23,144,000

Wadarta Guud Ee Miisaaniyadda US\$ 246,307,948

2 Qaybta Labaad **Maamulka Miisaaniyadda**

2.1 Awoodaha Xafiisyada Dowladda Federaalka Soomaaliya

1. Wasiirka maaliyadda waxaa loo Awood siiyay in uu fasaxo una qaybiyo dakhliga Dowladda Soomaaliya iyo lacagaha kaleba, cadadka halkan loogu qoondeeyay xafiisyadooda marka ay soo codsadaan mas'uuliyiinta xafiisyada Dowladda Federalka Soomaaliya ee ay khusayso, si ay hawlahooda ugu fushadaan.
2. Xafiisyada Dowladda waxaa loo awood siiyay in ay diwaan-galiyaan ciwaanka Miisaaniyadda la qoondeeyey, farac ciwaanka, mashruuca ama barnaamijyada xafiisyada, kolba kuu yahay. Waana inuu talaabada lagama-maarmaanka ah ka qaataa istic-maalka deyntra ama deeq kasta oo dheerada, haday tahay mood ama lacag oo laga helo illaha gudaha ama dibadda looguna talogalay fulinta miisaaniyadda mashariicda ama miisaaniyadda joogtada ah. Sidoo kale, waxa lagama maarmaan ah in bil ka hor dhammaadka sannad miisaaniyadeedka loo gudbiyo warbixin Wasaaradda.

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2016-KA

2.2 Miisaaniyad Wareejiin

1. Miisaaniyadda Joogtada ah waxaa loo wareejin karaa Misaaniyadda Mashaariicda.
2. Miisaaniyadda Mashaariicada looma wareejin karo Miisaaniyadda Joogtada ah.

2.3 Miisaaniyad Wareejinta Xafiiska Dhexdiisa

1. Wasiirku wuxuu xafiis dhexdiis:

B. Kala wareejin karaa kharashka Miisaaniyadda joogtada ah walax walax haddii ay isku madax yihiin

T. Ka wareejin karaa Miisaaniyadda mashruuc kuna wareejin karaa mashruuc kale, ka dib marka hay'adda Mashruucaasi hore ugu qoondeysnaa ogolaato Ra'iisul Wasaaraha ku aqbalo.

2. Wasiirku wuxuu u xilsaari karaa mas'uulka xafiiska Dowladda ee ku habboon oo ka tirsan Wasaaradda Maaliyadda in uu meel-mariyo ama fuliyo xilka iyo Awoodda lagu siiyay qodob-hoosaadka 1aad ee kor ku xusan.

2.4 Miisaaniyad Wareejinta Xafiisyada Dhexdooda

1. Wasiirku wuxuu wareejin karaa Miisaaniyadda joogtada ah ee loo qoondeeyay xafiis dawladeed in loo wareejiyo xafiis kale, kadib marka la xaqijiyo in xafiiska loo qoondeeyay Miisaaniyadda aanu wada istic-maalii karaynin Miisaaniyadaas, hay'adda loo qoondeeyeyna ogolaato Ra'iisul Wasaruhuna aqbalo.
2. Wasiirku wuxuu amri karaa in Miisaaniyadda Mashaariicda ee loo qoondeeyay Mashruuca xafiis loo wareejiyo Mashruuc kale. Kadib marka la xaqijiyo in Miisaaniyad yaraanta Mashruuca laga dabooli karo miisaaniyad mashaariic oo loo ansixiyey sanadkaas xafiis kale oo dowladeed.

2.5 Wareejinta Miisaaniyadda kaydka

1. Wasiirku wuxuu ka dib ogolaashaha Golaha Wasiirada amri karaa in Miisaaniyadda kaydka loo wareejiyo loona istic-maaloo kharash deg-dega ah kadib marka ay dhacaan hawlo gurmad deg-deg ah, oo u baahan kharash deg-deg ah, oo aan baahidoodu horay u muuqanin wakhtiga la diyaarinayay Miisaaniyadda sanadka. Kolka uu wasirka ansixiyo soo wareejinta kharashka keydka kabidda waxaa lagu wareejinayaa hay'adda ka mas'uulka ah. Wasiirka aaya si joogta ah u siin doona Golaha Shacabka warbixin ku aadan kharashka laga wareejiyey keydka kabidda.
2. Kharashka kaydka lama filaanka waxaa keliya oo loo isticmaali karaa xaalad degdeg ah sida fatahaado, abapro, cuduro dilaacay IWM, looma isticmaali karo baahida kharashka caadiga ah ee xafiisyada Dowladda.

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2016-KA

2.6 Miisaaniyadda Kabista

Golaha sharci dajintu isagoo ka duulaya tala bixinta golaha fulinta ayuu meel mariyaa Miisaaniyadda kabista ah.

2.7 Curaarta

Curaarta iyo Amaahda sharchiyeysan ee laga dhaxlay Miisaaniyadda 2015-ka ayaa noqoneysa curaar u gudbeysa sanadka 2016-ka, waxayna noqoneysaa qeyb ka mid ah mudnaanta kharashka, Wasiirka ayaa u xilsaaran xaqiijinta dhamaan deymaha iyo curaaraaha kuwooda sharciga ku qotoma iyo kuwa hareer marsan.

2.8 Qaamaha

Dowladda Federaalka Soomaaliya ma gali karto wax deyn ah gudaha ama dibadda, marka laga reebo lacago horumaris yar yar ah ayna tahay in lagu bixiyo isla sanad Miisaaniyadeedka gudihiisa iyo dayn istraatijig ah oo door weyn ka gali karta kobcinta dhaqaalaha.

3 Qaybta Sedexaad **Kharash Bixin**

3.1 Mudnaanta Kharash Bixinta

Haddii ay timaado hoos u dhac dhanka dakhliga ama deeqaha wasaraduna fulin weyso dhamaan kharashaadkii loogu talagalay Miisaaniyadda 2016-ka, waxaa mudnaanta bixinta kharashka loo raacayaa sida ay u kala horreyaan ee hoos taxan.

1. Raashinka iyo Gunnooyinka Ciidamada qalabka sida
2. Mushaarooyinka/gunnooyinka Shaqaalah Rayidka ah
3. Gunnada Xildhibaanada iyo G/Wasiirada
4. Mushaharka iyo gunnooyinka curaarta ku jira ee kasoo wareegay miisaaniyada sanadkii hore
5. Khidmadaha Maaliyaddu ku shaqeysyo (Finance Costs)
6. Adeegga iyo Agabka Xafiisyada Dowladda qaran iyo gobolba
7. Curaarta iyo Qaamaha la hormarsaday

3.2 Dhito

1. Dhakhliga Dowladda Federalka Soomaaliya waa in la dhigaa Khasnadda Dhexe ee Dowladda Soomaaliya 24 saacadood gudahooda oo ka bilaabanaysa marka la qabtay, haddii aysan ku soo aadin maalin aan la shaqaynaynin oo leh tixgelinteeda waqtii.

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2016-KA

2. Bangiga dhexe waa in uu aqbalaa qabashada dakhliga dawladda, islamarkaana uu meel-mariyo kharash bixinta isagoo isticmaalaya xisaabta Dowladda Federalka ah ee bankiga ka furan.

3.3 Lacagta Laga Bixiyo Miisaaniyadda Duuduubka

1. Iyada oo aanu golaha sharci dajintu ogolaan, wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda duuduubka ah.
2. Lagama gali karo kharash ama gedab Miisaaniyadda la ansixiyey, ka hor inta aanu ansixin ama qoondayn wasiirku.
3. Dhamaan bixinta qorsheysan waa in ay si toos ah uga baxdaa khasnadda dhexe una aadaa qaansheegatada ayadoon mareyn hay'adaha adeegga ama agabka la siiyey.
4. Dhamaan qabashada iyo bixinta lacageed ee miisaaniyadda waa in ay martaa hab-xisaabeedka dowladda (SFMIS) si elektronik ah, ka dibna la waafajiyaa warbixin xisaabeedka Bangiga Dhexe.
5. Dhamaan bixinta qaansheegatada iyo qandarasleyaasha waa in ay martaa barnaamij xisaabeedka dowladda (SFMIS), lagana bixiyaa madax iyo madax-xigeenada ku haboon ee khasnadda dhexe ee dawladda si toos ah uu qaato qofka iyo shirkadda qaansheegtada ah.

3.4 Xaddiga kharash Bixinta

1. Wuxaan ka ahayn, arrimaha lagu xeeriay qodobada 4 ilaa 8 ee Xeerkana lama oggola in la siiyo xafiis dowlad sanad miisaaniyadeed gudhiis kharash bixin ka badan cadadka miisaaiyadeed ee loogu qoondeeyay bayaankan Miisaaniyadda 2016.
2. Waxaa awood kooban loo siiyey hayadaha dawladda ee qoondaha miisaaniyadda ku jira inay gacanta ku hayn karaan kharash kooban oo loogu talo-galay hawlaho degdega ah (petty cash for emergencies) taasoo Wasiirku wareegto ka soo saari doono ku saabsan cadadka iyo waxyaabaha loo isticmaali karo.

3.5 Gedab

1. Wax gedab ah lagama gali karo qoondaha, kaliya inuu soo codsado Mas'uulka xafiiska Dowladda ama cid uu qoraal ku wakiishay mooyee.
2. Madax kasta oo xafiis dawladeed magali karo heeshiis ama nidaam kale oo uu baahan kharash, kaliya marka ay jirto hadhaa aan qaan ahayn oo ku filan in ay dabooshoo deynta lagali doono sanad miisaaniyadeedka 2016.
3. Wasaaraddu waxay aasaasi doontaa habraaca la raaco iyo hab diwaaneed qoraya dabagalka gedebka maaliyadeed ee walax miisaaniyadeed kasta.

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2016-KA

4. Madaxa xafiiska dawladdu wuxuu yeelan doonaa diiwaanno lagu hubiyo gedabyada maaliyadeed ee walax kharasheed kasta habka uu u xeeriyyey wasiirku.

3.6 Lacag Bixinta Agabka iyo Adeegga

1. Ka sokow foojarada kale ama cadaymaha loo bahan yahay, Xafis kasta oo dawladeed ma bixin karo lacag ilaa uu xaqijiyo ama hubiyo madaxa xafiisku ama cidda kale ee uu madaxa xafiisku u xil saaray.

B. Marka lacag bixintu tahay mid la xidhiidha hawl u baahan in la qabto, Alaab keenid ama adeeg.

I. Waa in ay tahay shaqada laqabtay, alaabta la keenay ama adeegga la bixiyay & qiimaha la saaray mid waafaqsan heeshiiska ama haddii ayna heshiiska ku caddayn noqdaa mid macquul ah.

II. Waa in ay noqoto mid-waafaqsan shuruudaha heeshiiska kharash bixintu, ka hor inta aan la dhammaystirin shaqada, aan la soo xarayn alaabta ama la helin adeegga

III. Waa in ay ahaato kharash bixinta mashaariicdu mid waafaqsan nidaamka iyo awaamiirta u deggan Wasaaradda, islamarkaana mac-quul ah oo sugar:
Ama

T. Lacagta kharash kasta oo kale waa in ay ahaato mid uu lacag-qaatuhu xaq u-leeyahay.

2. Wasaaraddu waxay soo saari kartaa nidaam lagu xaqijinayo ama hubinayo xaqiiqda cadaymaha uu u baahan yahay qodobkani.
3. Xafiisyada Dawladdu waxay yeelan doonaan sanduuq ay ku kayd sadaan lacagta hawl fulinta cadadka yar, cadadka lacageed ee loo istic-maali doono hawl-fulin waxaa go'aamin doona wasiirka.

3.7 Lacagta aan la Ithic-maalin

1. Iyadoo lagu xeerin doono wareegtooyin ay wasaaraddu soo saarto ayaa waxaa lagu celin khasnada dhexe hadhaaga Miisaaniyadda la qoondeeyey ee sanad Miisaaniyadeedku ka dhacay, aan la istic-maalina. Wuxaan lagu kordhinayaan sanduuqa qasnada dhexe ee wasaaradda.

3.8 Warbixin Xisaabeedka

1. Dhamaan Hay'adaha Dowladda waa in ay u keenaan Xisaabiyaha Guud iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda dhamaan xisaab xidhka kharajka iyo dakhliga ee bishaas ugu danbeyn 7da bisha xigta iyadoo la raacayo qaabka uu tilmaami doono Xisaabiyaha Guud. Waxaa awood loo siiyey Wasaaradda inay hakiso bixinta qoondaha ee miisaaniyadda ee hay'adaha keeni waaya xisaab-xirkha billaha ah.

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2016-KA

2. Warbixinta Miisaaniyadda ayaa si bille iyo rubac sanadle ah lagu daabici doonaa website-ka Wasaaradda, xilliga kama danbeysta ah ee bilkasta lagu daabacayo warbixinta, wasiirka ayaa ku soo saari doona wareegto.

4 Qayabta Afraad Qoondaynta Miisaaniyadda

4.1 Qoondaynta Miisaaniyadda Xafiisyada Dowladda

1. Miisaaniyadda hoos ku xusan waxaa loo qoondeeyay xafiisyada Dowladda sanad Miisaaniyadeedka 2016-ka, waana sida hoos ku xusan.

a) **Miisaaniyadda Joogtada ah** **US\$ 223,163,948**

b) **Miisaaniyadda Raasumaalka** **US\$ 23,144,000**

Wadarta Guud **US\$ 246,307,948**

2. Faah-faahinta qoondaha Miisaaniyadda waxay ku caddahay oo ay ku fahfaahsantahay xagga hoose ee bayaankan

4.2 Muddada Dhaqan-galka

Yeerkana wuxuu dhaqangalayaa maalinat Goalah Shacabku ansixiyo ee sanadka 2016

Laga soo saaray Muqdhisho _____ malinta _____ 2016

**Madaxwaynaha
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaali**

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2016-KA

5 Lifaqyada Miisaaniyadda 2016-ka

5.1 Soo Koobidda Dakhliga iyo Kharashka Miisaaniyadda Sanadka 2016

Soo Koobidda Dakhliga iyo Kharashka Miisaaniyadda 2016-ka (Malyan US\$)

FAAH-FAAHIN	2014 Dhabta	2015 Kutalagalka	2015 Kunoqoshada Miisaaniyadda	2016 Kutalagalka	Isbadalka	% Isbadalka
1. DHAKHLIGA & DEEQQAHA	145.3	239.9	199.0	246.3	47.3	23.8%
(A) DAKHLIGA GUDAHA	84.3	123.4	113.9	139.2	25.3	22.3%
DAKHLIGA CANSHUURAADKA	73.8	103.1	85.7	107.8	22.0	25.7%
Canshuurta Faa'idal Faa'ida	1.1	4.6	4.7	5.1	0.4	8.0%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	64.3	72.7	70.3	86.0	15.7	22.4%
Canshur kale ee Dadban	4.8	22.6	6.4	12.6	6.2	96.4%
Canshuuro Kale	3.6	3.2	4.3	4.1	-0.3	-5.9%
Dakhliga aan Canshur ahayn	10.5	20.3	28.1	31.5	3.3	11.8%
(B) DEEQQAHA DIBADDA	61.0	116.5	85.2	107.1	21.9	25.8%
Deeq Laba Dhinac ah	59.0	39.9	35.4	30.0	-5.4	-15.1%
Deeq Dhinacyo Badan	1.9	76.7	49.8	77.0	27.3	54.8%
2. KHARASHKA GUUD	151.1	239.9	199.0	246.3	47.3	23.8%
(C) KHARASHKA JOOGTADA AH	150.9	226.0	184.5	223.2	38.7	21.0%
Adeegga Shaqaalah	77.2	109.4	79.1	91.3	12.2	15.4%
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	57.6	80.5	75.8	81.3	5.6	7.4%
Deeqaha Dowladda Dhexe	10.1	16.0	15.2	16.1	0.9	5.7%
Keydka Kabidda	3.8	3.2	2.7	2.4	-0.3	-12.0%
Curaar iyo Qaan	2.2	17.0	11.7	32.0	20.3	173.9%
(D) KHARASHKA RA'SUMAALKA	0.2	13.9	14.5	23.1	8.6	59.1%
Mashaariic	0.2	13.9	14.5	23.1	8.6	59.1%
(E) FARAAQA	-5.8	0.0	0.0	0.00	-0.0	

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2016-KA

5.2 Faah-faahinta Dakhliga Guud Dowladda Ee Miisaaniyadda 2016-ka

DOWLADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA WASAARADDA MAALIYADDA WADARTA QIYASTA DAKHLIGA MIISAANIYADDA 2016-KA (US\$)				
Madax Xigaha	FAAH-FAAHIN	2014 Dhabta	2015 Ku Noqoshada Miisaaniyadda	2016 Kutalagalka
	WADARTA GUUD EE DAKHLIGA	145,275,764	199,033,838	246,307,948
	Wadarta Dakhliga Gudaha	84,313,479	113,877,955	139,221,120
	Dakhliga Canshuurta	73,818,455	85,741,755	107,771,120
1110	Tax on Income, Profit and Capital Gains	1,075,056	4,748,463	5,130,120
111101	Caanshuurta Mushaharka (Shaqaalaha Dowladda)	943,014	3,198,463	2,843,435
111102	Canshuurta Mushaharka (Shaqaalaha Gaarka ah)	132,043	1,000,000	1,416,685
111201	Canshuurta Faaidoyinka Ganacsiba	-	500,000	800,000
111204	Canshuurta Daaraha	-	50,000	70,000
1140	Canshuurta Adeega & Alaabta	8,474,342	10,723,692	16,641,000
1141	Canshuurta Dheeraadka ah	-	-	120,000
114101	Biyaha Sifeysan	-	-	120,000
1142	Canshuurta libka	-	-	675,000
114202	Qaansheegadka Hoteeladda	-	-	675,000
1143	Canshuurta Macaashka Adeega	4,832,938	6,400,000	11,776,000
114301	Isgaarsiinta	4,832,938	4,800,000	7,280,000
114302	Xawilaadaha	-	800,000	800,000
114303	Warshadaha Krontadda dhaliya	-	500,000	3,600,000
114304	Shirkadaha Biyaha	-	300,000	96,000
1144	Canshuurta libka Farankabooladda	3,641,403	4,323,692	4,070,000
114404	Dakhliga Canshuurta Scodka Gaadiidka	3,286,661	3,669,807	3,200,000
114405	Dakhliga Diiwaangalimaha kale	354,742	653,885	870,000
1150	Canshuurta Ganacsiga Dibada ka yimaado	64,269,057	70,269,600	86,000,000
115000	Furdooyinka	-	60,669,600	74,000,000
115107	Casnhuurta Jaadka so daga	7,630,873	9,600,000	12,000,000
1400	Dakhliga aan Canshuurta ahayn	10,495,024	28,136,200	31,450,000
142101	Qidmadda Maamulka	795,467	1,275,800	450,000
142103	Qidmadda Garoonka Diyaaradaha & Dekedda	5,516,349	21,500,000	25,000,000
142105	Canshuurta Dal kugalka & Baasabooradda	4,183,208	5,360,400	6,000,000
1300	Deeqaha	60,962,285	85,155,883	107,086,828
1321	Kaalmo laba geesood	59,035,031	35,393,915	30,043,387
132105	Turkey	-	15,717,200	30,043,387
132104	UAE	-	9,800,000	-
132201	Norway (Capital)	-	9,100,000	-
132201	Norway (SSF)	-	776,715	-
132103	Other Bilateral Assistance	59,035,031	-	-
1330	Deeq Dhinacyo Badan	1,927,254	49,761,968	77,043,441
132103	Jamacadda Carabta	-	999,979	-
132404	Bangiga Aduunka- Mashruuca PFM	1,927,254	7,359,000	5,499,000
132405	Bangiga Aduunka- Mashruuca RCRF	-	27,800,000	35,900,000
132408	Bangiga Horumarinta Afrika- Mashruuca EFG	-	2,676,048	3,000,000
132407	Bangiga Aduunka - Mashruuca ICT	-	5,900,000	5,900,000
132409	Mashruuca PBF (Peace Building Fund)	-	1,887,500	14,500,000
132403	Bangiga Aduunka - Mashruuca CIP	-	3,139,441	3,139,441
132402	Bangiga Aduunka - Mashruuca MPTF (Multi-partner Trust Fund) TIU	-	-	3,705,000
132409	Midowga Yurub (Mushaaraadka Booliska)	-	-	5,400,000

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2016-KA

5.3 Qoondada Hay'adaha Ee Miisaaniyadda 2016-ka

Madax	FAAH-FAAHIN	2015 Kutalagalka	2015 Ku Noqoshada Miisaaniyadda	2016 Kutalagalka
1	Wadarta Guud	239,942,191	199,033,838	246,307,948
10101	Xafiiska Madaxtooyada	4,955,688	4,370,876	4,573,520
10201	Xafiiska Baarlamaanka	3,689,516	3,089,676	4,308,324
10202	Xubnaha Baarlamaanka	12,115,200	11,673,712	11,853,712
10301	Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha	4,207,920	4,272,600	4,954,608
10302	Agaasinka Bii'ada iyo Duur joogta	457,164	393,984	448,380
10303	Mashruuca CIP	3,139,441	3,139,441	3,139,441
10401	Wasaaradda Arrimaha Dibedda	3,393,668	2,694,855	1,949,720
10402	Safaaradaha	6,978,000	4,929,600	4,929,600
10501	Wasaaradda Maaliyadda	5,175,588	5,863,792	6,573,112
10502	Xisaabiyaha Guud	697,620	761,064	901,440
10503	Adeegga Guud Ee Dowladda	39,670,600	33,080,000	52,970,191
10504	Mashruuca SFF	9,876,715	9,876,715	18,205,000
10505	Mashruuca PFM	7,359,000	7,359,000	5,499,000
10506	Mashruuca EFG	2,676,048	2,676,048	3,000,000
10507	Mashruuca RCRF	3,620,142	3,620,142	5,900,000
10601	Wasaaradda Qorsheynta Iyo Isk. Cal.	907,056	964,256	1,116,288
10701	Wasaaradda Arr. Gudaha iyo Fadaraalka	1,619,840	3,519,724	6,567,440
10702	Guddiga Qaxootiga Q. iyo Barakacayasha	472,800	472,800	472,800
10703	Hay'adda Maareynta Musiibooyinka	252,000	252,000	252,000
10801	Wasaaradda Arr. Diinta iyo Awqaafta	875,676	567,060	648,900
10901	Wasaaradda Cadaaladda	776,400	550,188	553,332
10902	Ciidanka Asluubta	4,331,592	4,332,000	4,836,000
10903	Maxkamadda Gobollka Banaadir	1,231,212	1,155,612	1,243,272
10904	Maxkamadda Racfaanka	212,340	204,144	211,824
10905	Guddiga Adeegga Garsoorka	172,992	164,052	172,992
10906	Maxkamadda Dastuuriga ah	222,000	222,000	222,000
11001	Maxkamdda Sare	438,492	419,604	434,640
11101	Xeer-ilaaliyaha Guud	1,045,728	1,038,648	1,028,340
11201	Garyaqaanka Guud	404,184	401,364	490,584
11301	Hanti-dhowrka Guud	957,000	900,240	1,346,016
115	Wasaaradda Dastuurka		326,812	481,632
11601	Guddiga M. Banaan Ee Xududaha & Fed.	252,000	252,000	636,000
11602	Guddiga M. Banaan Ee Dibu Heshiisiinta	426,708	426,708	492,552
11603	Guddiga Madaxa Banaan ee Dor. Q.	250,000	250,000	756,000
11604	Guddiga M. Banaan Ee Xuquuql Ad.	241,200	241,200	396,000
11605	Guddiga M. Banan Ee Dibu Eegista & H/Das.	423,792	727,632	610,236

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2016-KA

11606	Guddiga Madaxa Banaan Ee Shaqalahaa	421,416	430,356	758,616
20101	Wasaaradda Gaashaandhiga	978,500	1,036,100	1,064,100
20102	Taliska Ciidanka Xooga Dalka	58,821,768	34,525,680	32,069,640
20103	Maxkamadda Ciidamadda	1,008,000	996,000	996,000
20104	Hay'adda Naafada iyo Agoonta CQS	-	-	120,000
20201	Wasaaradda Amniga Qaranka	2,526,256	2,063,096	2,558,296
20202	Taliska Ciidanka Booliska	14,362,000	6,762,000	17,347,560
20203	Hay'adda Nabadsugidda Qaranka	8,855,600	10,056,080	10,056,080
20204	Hay'adda Socdaalka & Jinsiyadaha	1,722,000	1,722,000	1,722,000
30101	Wasaaradda Tamarta & Biyaha	623,544	639,544	684,084
30201	Wasaaradda Macdanta	654,540	1,080,380	627,468
30301	Wasaaradda Beeraha	978,100	749,860	758,424
30401	Wasaaradda X. Xoolaha, Dhirta & Daaqa	707,724	654,360	751,836
30501	Wasaaradda Kallumaysiga & Khey. B.	813,000	789,860	909,180
30502	Hay'adda Cilmi Baadhista Badaha Som.	312,000	350,148	413,268
30503	Mashruuca H. Xeebaha & Kalluumeyisiga			104,340
30601	Wasaaradda Warfaafinta	3,320,088	3,360,008	3,535,332
30701	Wasaaradda Boostada & Isgaadhsiinta	1,196,040	1,185,128	1,182,111
30702	Mashruuca ICT	5,900,000	5,900,000	5,900,000
30801	Wasaaradda H. Guud iyo Dib-u-dhisika	632,760	647,600	768,880
30901	Wasaaradda Gaadiidka & Dul. Hawadda	1,109,076	942,176	932,196
30902	Hay'adda Saadaasha iyo Dul. Hawadda	680,556	781,296	674,556
31001	Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka B.	1,024,092	1,047,204	1,053,204
31002	Dekadda Xamar	1,009,320	1,009,320	1,009,320
31101	Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha	1,022,520	1,402,940	1,486,860
40101	Wasaaradda Caafimaadka	793,032	781,932	1,082,832
40201	Wasaaradda Waxbarashadda	3,460,396	1,335,008	1,371,232
40202	Jaamacadda Umadda	1,044,969	1,058,913	1,418,913
40203	Hay'adda Cilmi, Fanka iyo Sugaanta	253,392	240,612	254,412
40204	Akademiya Goboleedka Afka Soomaaliga	200,000	194,000	194,000
40301	Wasaaradda Shaqada & Arr. Bulshada	760,116	798,464	1,010,088
40401	Wasaaradda Isboortiga & Dhalinyarada	572,220	571,200	577,200
40501	Wasaaradda Hawenka & Hor. Xuq. Ad.	653,844	733,024	741,024